

## TALLAALKA LOOGA HORTAGO CUDURKA CAABUQA EE DHIIGA KU FAAFA

### Cudurka caabuqa ee dhiiga ku faafa

Waxaa jira in ka badan 90 nooc oo cudurada kala duwan ee jeermiska cudurka caabuqa ee dhiiga ku faafa ah. Dhoor ka mid ah kuwaan waxay u keeni karaan aadanaha cuduro, sida caadiga ah wareentada, hindhisada iyo caabuqa dhagta dhexe. Maraka qaarkood dhaawaca wuxuu noqon karaa halis weyn, sida sunta dhiiga (jeermiska) ama caabuqa fadhiga maskaxda (caabuqa-jeermiska). Jeermiska cudurka caabuqa ee dhiiga ku faafa wuxuu u keeni karaa cuduro labadaba carruurta iyo dadka weyn, laakin waxaa jiro noocyoo kale duwan oo xukuma kooxyada da'da kale duwan ah. Xaaladaha intooda badan oo halista cudurka caabuqa ee dhiiga ku faafa waxay ku dhacdaa canug walbo oo yar, oo shaqsi ahaan in kabadan 65 iyo qof ahaan oo ay la jiraan arimo halis gaar ah.

Barashada tallaalka ka hor, 60–80 carruur gaaraysa oo ka yar da'da labo sanno jirka ayaa waxaa saameeyo sanad kasta halista cudurka caabuqa ee dhiiga ku faafa. Carruurta badanaa horay ayay u caafimaad qabeen iyo gaar ahaan uguma dhicin cudurka.

### TALLAALKA CUDURKA CAABUQA EE DHIIGA KU FAAFA

Tallaalka wuxuu wataa qeybo ka mid ah kaabsolka sokorta jeermiska (polysaccharide) oo isku jirka borotiinka ah. Tallaalka wuxuu ka hortagaa 13 nooc oo cudurka caabuqa ee dhiiga ku faafa. Barashada tallaalka ka hor, 13 kaan nooc waxay ahaayeen sababaha qeybta wax ku oolka ah ee cudurada caabuqa ee dhiiga ku faafa oo caruurta ka yar da'da labada. Tallaalka sidoo kale wuxuu yareeyaa tirada dacwadaha caabuqa dhaqta dhexe oo ay keenene noocyadaan cudurka caabuqa ee dhiiga ku faafa. Tallaalka ma ka hortagto cudurka sida ay sababtay cudurka caabuqa ee dhiiga ku faafa oo aan ka aheyn 13 ka ku jiro tallaalka. Ma ka hortagto cudurka sababo jeermiska kale ama faayruska ah.

Tallaalka carruurnimada ka hortaga faayruska caabuqa dhiiga ku faafa waxaa la siiyaaa isla markaas sida tallaalka isku darka ah ee ka hortago jeermiska qumanka, jeermiska-teetanada, jeermiska-xiiq dheerta, dabeysa, jooniska/cagaarshowga b iyo cudurka Hib.

#### Saameynta-dhinaca guud:

Gaduudashada, bararka, danqashada ama xannuunka oo dhinaca tallaalka ah waxay dhacdaa in kabadan 10 % oo dadka tallaalan iyo waxay jiri kartaa kartaa dhoor maalmood.

Nasiinyo la'aanta, xanaaqa, oo hinta, dareen wanaag la'aanta, hurdo la'aan, cunto yarida ama dareenka jiro oo 1–2 maalmood ah ka dib markii tallaalka uu ku dhaco dadka qaarkii. Way adagtahay in la ogaado hadii aastamaaha noocaas ah ay sabab u utahay tallaalka ama wax kale.

Qandho kooban ayaa dhacdo.